

**X. M. J. 23 Maajo 1961, lamba. 144.**

**Xadeynta qiimayaasha midnimo, ee lootooyinka dhismo, ee gudaha Muqdisho.**

**MADAXWEYNAHA KMG EE JAMHUURIYADDA**

Markuu arkay qodobka 75aad, ee Dastuurka;

Markuu arkay X.M. 18 Maajo 1956, lamba. 78;

Markuu arkay X.M. ee 25 Juunyo 1960, lamba. 43;

Markuu tixgeliyey in qiimooyinka dhulalka dhisme, oo ku yaal degaanka Muqdisho, laga bilaabo taariikhda dib-u-habeyntii ugu dambeysay, waxa ku dhacay koror weyn, marka loo eego horumarka dhismaha oo dhacay sanadadii ugu dambeeyey;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Kaddib soojeedinta Wasiirka Lacagta;

**WUXUU XEERINAYAA**

**Qod. 1**

Qiimooyinka midnimo (ee mk), ee lootooyinka dhismooyinka demaniyaalaha ah oo karo dadka gaarka laga siin karo degaanka Muqdisho, waxa ay yihiin kuwo ku góan cabbirka ka muuqda jadwalka (tabeellaha) soo socda oo ah qayb aan ka góaynin Xeerkan.

Aag	Magadhow	Qiimaha mtk2 Sh. So,	Xadka ugu sarreeya bedka la bixin karo Mtk2
I	Barta dhexe	20	2.000
II	Barta dhexe ee hakadka	10	2.000
III	Qayb ka sii ah barta dhexe	6	2.000
IV	Qayb ka sii ah barta dhexe ee hakadka	4	3.000
V	Daafaha	2	4.000
VI	Daafaha hakadka	1	4.000
VII	Debadeed	0,50	5.000

**Qod. 2**

Tariifooyinka ku xusan qodobka hore, ee laad,ayaa la dabbaqayaa xagga lootooyinka la bixiyey ka hor dhaqangalka xeerkan, haddii xagga lootooyinka la soo sheegay aan mar hore laga shubin qiimaha bixinta ruqsada.

### **Qod. 3**

Axkaam kasta oo ka horimaaneysa ama aan la socon karin Xeerkan waa la baabiiyey.

Muqdisho, 23 Maajo 1961

**Adan Cabdulle Cusmaan**

Wasiirka Kowaad

**Cabdirashiid Cali Sharmarke**

Wasiirka Lacagta

**Cabdulqaadir Maxamed Aadan**

Waa arkay waana Diiwaangeliyey-

Diiw. lamba. 7 – Xaashi lamba. 49.

Muqdisho, 11 Juunyo 1961.

Hantidhowraha: **Axmed Dahir**